# Casharka 14 Baabtiiska

Faarax waa uu yaabanyahay. Sanadkii hore ayuu raacay Masiixa waxaanu ku korayaa rumaysadkiisa uu Masiixa rumaysanyahay. Dhowaan waxa dhacday in nin kale oo Masiixi ah uu ku yidhi, 'waxaad u baahantahay in lagu baabtiiso'. Arrintani waxay Faarax ku sababtay inuu su'aalo badan is waydiiyo:




***Faarax***

Casharkeenna maanta aan isku dayno inaan kaga jawaabno su'aalahan Faarax is waydiiyay.

**'Waa maxay baabtiisku?'**

1 'Baabtiiska' macnihiisa tooska ahi waxa weeyi biyo muquurin. Axdiga Cusub waxaynu ku arkaynaa sidii Yooxanaa Baabtiisuhu (Yaxye) uu dadka ugu baabtiisay Webi Urdun isagoo xitaa baabtiisay Ciise. Maanta Masiixiyiintu waxay isku baabtiisaan webi ama taagi biyood dhexdii kolba wixii la helo, waana iyadoo qofku biyaha dhex muquurto. Waxa kale oo iyana la isticmaalaa in biyaha qofka dusha looga shubo ama lagu rusheeyo.

Munaasabaddan baabtiiska ee muhiimka ah waxa la qabanqaabiyaa oo keliya marqudha inta aan noolnahay. Waa maxay magaca loo yaqaanno munaasabaddan? _____________

**'Maxaa la ii baabtiisayaa?'**

2 Waxa la inoo baabtiisayaa waa iyadoo Sayid Ciise Masiix uu amray. Waxa uu yidhi

"Haddaba taga, oo quruumaha oo dhan xer ka dhiga, oo ku baabtiisa magaca Aabbaha iyo Wiilka iyo Ruuxa Quduuskaa". (Matayos 28:19)

Aayaddani waa muhiim ee dusha ka xafid.

3 Isagoo addeecaya amarkii Masiixa, rasuul Butros waxa uu dad badan oo joogay Yerusaalem u sheegay *"toobadkeena oo ha la idin baabtiiso"* (Falimaha Rasuullada 2:38). Maalintaas iyada ah waxa la baabtiisay saddex kun oo qof kadib markii ay aqbaleen wacdintiisu farriintii ay xanbaarsanayd!

Waa maxay sababta aan ugu baahanay baabtiiska? (*dooro mid)*

___ a) Waayo anigaa raba inaan sameeyo
___ b) Waayo waxa sidaas raba saaxiibbadayda Masiixiyiinta ah
___ c) Waayo waxa igu amray Sayid Ciise Masiix inaan sameeyo

**‘Baabtiisku muxuu tusinayaa?’**



Baabtiisku aad buu muhiim u yahay. Sida Axdiga Cusubi dhigayo, baabtiisku waxa uu tusinayaa inaan:

A. Masiixa ku ahay qof cusub

B. dembiyadaydii la maydhay

C. ku biiray ummada Masiixa

Aynu imminkana wax ka barano xaqiiqooyinkan cajiibka ah.

***A) Waxaan Masiixa ku ahay qof cusub***

4 Dadka qaar waxay ka cabsadaan inay biyaha dhex galaan marka baabtiiska. Ha ka warwarin middaas waayo waxaabay qaadataan waqti aad u yar mana aha wax khatar keeni kara. Laakiin waxa weeyi baabtiisku calaamad ku fadhida macno oo ah ka tarjumaysa waxa inagu dhacaya marka aan rumaysano Masiixa. Waxay ka dhigantahay inagoo nolosheennii hore ee dembiga lahayd ku muquurinayna biyahay isla markaana la sarakacayna nolol cusub oon ku helnay Masiixa aawadii!

Khad ku xidhiidhi sida ay macnayaaashoodu isugu habboonyihiin falalkan soo socda:

| *falka* | *macnaha* |
|---|---|
| a) muquurashada biyaha | 1. Kicitaanka anigoo Masiixa ku ah qof cusub |
| b) ka soo sarakicidda biyaha | 2. Waxa dhimatay dabiicaddaydii hore |

5 Haddaba, baabtiisku waxa uu la macno yahay in noloshaydii hore ay dhammaatay oo imminkana aan qof cusub ku noqday Masiixa. Ereyga Ilaah waxa uu leeyahay,

“Haddaba waxaynu isaga kula aasannay baabtiiska dhimashada dhexdeeda, in, sidii Masiixa kuwii dhintay loogaga sara kiciyey ammaanta Aabbaha, aan innaguna sidaas oo kale cusaybka nolosha ku dhex soconno.” (Rooma 6:4)

Waa maxay waxa koowaad ee baabtiisku tusinayo? *(goobaab jawaabta saxda ah)*

[ Waxaan Masiixa ku ahay qof cusub / Waxaan weli ku jiraa noloshaydii hore ee dembiga]

6 Inta badan dadku waxay biyaha baabtiiska ku dhex muquurtaan iyagoo xidhan dharkoodii hore oo ka tarjumaya dabiicaddoodii hore ee dembigu ku dheehnaa. Kadibna waxay ka soo baxaan biyaha waxaanay xidhaan dhar cusub oo nadiif ah oo tusinaya noloshooda cusub ee ay ku heleen Masiixa.

***Haddii hore laguu baabtiisay, maxaad dareentay markii aad biyaha ka soo baxday? U diyaargarow inaad arrintan kaga hadasho waqtiga falanqaynta.***

7 Guuleed waxa weeyi Masiixi ka soo jeeda Afrika oo hore u haystay diintii aad adiguba hore u haysatay. Waxa uu halkan kaga hadlayaa wixii uu dareemay markii la baabtiisay kadib:

> "Waxaan dareemay inaan ka dhintay dabiicaddaydii hore ee dembiga miidhan ahayd, isla markaana aan naftayda siiyay Ilaah oon noqday qof cusub. Ma ihi Guuleed kii ay hore asxaabtaydu u yaqaanneen, laakiin waxaan ahay Guuleed cusub oo la cafiyay, mar kale dhashay, Ruuxuna hagayo. Guuleedkii hore wuu dhintay waxaana hadda nolol ku dhex helay Masiixa Guuleedka cusub. Waxaan biyaha ka soo dhex baxay amigo dareemaya inaan ahay qof cusub!"

Sanduuqan kore dhexdiisa, immisa jeer ayuu Guuleed adeegsaday ereyga 'cusayb'? ___ hoosta ka xarriiq.

8 Waa maxay waxa xaqiiqada koowad ee baabtiisku tusinayo? Waxaan Masiixa ku dhex ahay_________

***B) Dembiyadaydii waa la maydhay***

9 Falimaha Rasuullada 22:16 waxay inoo sheegaysaa xaqiiqo kale oo ku saabsan baabtiiska: "*ha lagu baabtiiso, oo dembiyadaada iska maydh*".



Sida aayaddani inoo sheegayso, maxay aayaddani ina baraysaa ee baabtiisku tusinayaa?

*(mid dooro)*

___ a) Waxaan qof cusub ku ahay Masiixa

___ b) Dembiyadayda waa la maydhay

10 Sidaan ognahay, weysaysiga iyo maydhashada caadiga ahi kuma filna inay dembiyadeenna inaga maydhaan. Biyuhu waxay maydhaan oo keliya wasakhda jidhka dushiisa ku taalla, laakiin ma maydhi karaan qalbiyadeenna iyo waxa niyaddeenna ku jira.

Si kastaba ha ahaatee, baabtiisku waa calaamad muuqata oo xooggan isla markaasna tusinaysa nadiifinta gudaha ee Masiixu ku sameeyo qalbiyadeenna. Waxa uu iskutallaabta korkeeda ugu dhintay inuu middan suurtogal ka dhigo. Akhri 1 Yooxanaa 1:7 *(fiiro u yeelo in 1 Yooxanaa uu yahay kitaab gaadha oo ka mida Kitaabka Quduuska ah kana duwan Yooxanaa).*

Sida ku xusan 1 Yooxanaa 1:7, maxaa inaga nadiifiya dembiga oo dhan? __________________

11 Rasuul Butros oo intii uu noolaa baabtiisay dad badan, ayaa baabtiiska wax ku saabsan ku qoray 1 Butros 3:18-22. Fasiraadda aayadahani ma fududa, laakiin waxa ugu muhiimsan ee ay ka hadlayaan waa:

- Badbaadadeennu waxay ku timid silica Ciise (aayadda 18) iyo sarakiciddiisa (aayadda 21)
- Biyuhu waxay calaamad u yihiin badbaadadan (aayadda 21) sidii Nuuxba ay ugu ahaayeen (aayadda 20)

Munaasabaddee i xasuusinaysa in dembiyadayda la maydhay?

___ a) baabtiiskayga ___ b) arooskayga ___ c) aaskayga

***C) Waxaan ku biiray ummadda Masiixa***



12 Marka la ina baabtiiso waxaan si laga wada markhaati yahay ugu biirnaa ummadda Masiixa. Waxa aynu ka koobanahay rag iyo dumar ka kala socda cirqiyo kala duwan laakiinse dhammaan midoobay *“Waayo, Ruux qudha ayaa dhammaanteen jidh qudha inagu baabtiisay.”* (1 Korintos 12:13).

Waa maxay xaqiiqada saddexaad ee baabtiisku tusinayo?

Waxaan ku biiray ____________________

13 Baabtiisku maaha waxa adiga oo keliya kugu kooban laakiin waxa uu ka dhexeeya Masiixiyiinta oo dhan. Waxay marag ka noqonayaan Masiixiyiintu munaasabadda baabtiiskaaga iyagoo marka ay dhammaatana kugu odhan doona ereyo soo dhoweyn ah sida:

| |
|---|
| “Waxaan kugu soo dhoweynaynaa qoyska Rabbiga. Waxaynu dhammaanteen xubno ka nahay jidhka Masiixa; waxaynu dhammaan nahay carruurta Ilaaha Aabbaha ah ee samada ku jira; waxaynu dhammaanteen wada dhaxlaynaa boqortooyada Ilaah. Waan ku soo dhoweynaynaa.” |

- ***Miyaynaan nasiib lahayn inay ina soo dhoweeyaan dadka Ilaah doortay! Halkan ku hako Ilaah ugu mahadnaq walaalaha rumaystayaasha ah ee uu ku siiyay.***

14 Maxay yihiin saddexda xaqiiqo ee baabtiisku tusinayo? *(buuxi meelaha bannaan)*

a) Waxaan Masiixi ku dhex ahay qof _________

b) __________ waa la maydhay

c) Waxaan ___________ ummadda Masiixa

Faarax wuu ku faraxsanyahay inuu ogaaday xaqiiqooyinkan. Su’aasha xigta ee uu waydiinayaana waxa weeyi:

**‘Baabtiisku ma aad buu muhiim u yahay?’**

15 Si marka loo eego asaasi uma aha badbaadada, waayo waxa la inagu badbaadiyay rumaysashada iyo isku hallaynta Masiixa mana biyuhu waxa keenaya badbaadada. Laakiin baabtiiska hadana waxa inagu amray Masiixa! Sida aynu soo aragnayna waa calaamad muhiim u ah ka mid noqoshada kaniisadda. Sidaas aawadeed, waa in lagu baabtiisu marka waqti ku habboon la helo.

a) Dhaqamo badan markaad qof fartiisa ku aragto fargalka guurka maxay taasi muujinaysaa?
____________________________

b) Fargalku asaasi uma aha in labo qof is guursadaan, balse calaamaddaasi yay muhiim u tahay?
______________

c) Sidaas si la mida, baabtiiskeennu wuxuu calaamad u yahay inaan ka mid nahay ayo?
_____________

16 Baabtiiska waxaan ku muujinaa inaan ku abtirsano Masiixa. Waxaynuna ku faraxsanahay inaan middan u sheegno walaaleheenna xagga Masiixa. Waxa dabcan lagu waydiin doonaa marka lagu baabtiisayo inaad bixiso markhaatifurkaaga. Tani waxay ka dhigantahay inaad qof walba u sheegayso sida Masiixu u beddelay noloshaada.


Aynu middan isku dayno imminka. Ka soo qaad inaad markhaatifurkaaga ka bixinayso goobta lagugu baabtiisayo. Marka uu hoggaamiyuhu ku waydiiyo “Is beddel noocee ah ayaa Masiixu ku keenay noloshaada?”, maxaad ku jawaabi doontaa?

*Qor wixii aad odhan lahayd oo u diyaargarow falanqaynta. Haddaad rabto, eeg wixii aad qortay markaan ku jirnay casharka 2 su’aasha 15. Laakiin halkan ku qor imminka iyadoo faahfaahsan.*

17 Salma xaaladda ay ku jirto uma saamaxayso in la baabtiiso. Talada ugu wanaagsan ee la siin karaa maxay tahay, a) ama b)?

___ a) ‘Ha ka warwarin, baabtiisku muhiim maaha’

___ b) ‘Baabtiisku aad buu muhiim u yahay ee Ilaah ka bari inuu kuu suurto geliyo in lagu baabtiiso waqtiga ugu habboon’.




**‘Goormaa la i baabtiisayaa?’**

18 Masiixiyiinta qaarkood waxay ku taliyaan in lagu baabtiiso isla marka aad Masiixa aqbasho. Kuwo kalena waxay ku taliyaan in la sugo ilaa inta iimaankaagu ka xoogaysanayo. Dhegayso talada Masiixiyiinta laakiinse waxa kale ood xisaabta ku darsataa waxa uu kuu sheegayo Ruuxa Ilaah. Ilaah baa kugu hanuunin doona tallaabadan muhiimka ah. Marka uu waqtigu sax yahay, waxa aad arrintaas ka dareemi doontaa qalbigaaga.

Yaanay dadku ku dedejin haddii aanad diyaar u ahayn. Laakiin sidoo kalena waxba dib ha u sii ridin haddii Ilaah kuu sheegayo in waqtigaas la joogaa uu yahay kii lagu baabtiisi lahaa.

Falalkan soo socda kuwee ayaa wanaagsan? *(dooro labo jawaabood)*

___ a) dhegayso talada Masiixiyiinta xigmadda leh ee kaa fikiraya

___ b) iska ilaali inaad baabtiiska u sameeyso cabsi aawadeed

___ c) baabtiisku inaanu muhiim ahayn ka soo qaad

___ d) ha lagu baabtiiso marka Ilaah kuu muujiyo arrintaas samaynteeda

19 Masiixiyiinta xigmadda leh ayaa baabtiiska talo kaa siin doona. Laakiin Masiixiyiinta qaarkood ayaa si xigmaddarro ah u sameeyo baabtiiska, halka kuwo kalena ay u sameeyaan baabtiiska si magacoodu kor ugu kaco. Sidaa daraaddeed, isku day inaad hesho qof aad ku kalsoontahay oo kuu qabanqaabiya baabtiiskaaga.

Haddaad garanayso qof talo wanaagsan kaa siin kara baabtiiska, sax sanduuqan dhexdiisa ☐. Haddaanad garanayn qof ku habboon arrintaas, waxaad kala hadashaa la taliyahaaga.

20 Waxaynu marhore u soo aragnay macnaha baabtiisku ugu fadhiyo Masiixiyiinta. Laakiin muxuu baabtiisku uga dhiganyahay dadka qaraabadeenna ah een Masiixiyiinta ahayn? Iyaga waxa uu calaamad ugu yahay inaan goynay oon ku sababnay ceeb iyo xushmaddarro.

Sideen markaa u qaadanaa baabtiiska?

___ a) Si cabsiyi ku jirto inagoo ka walaacsan bad-qabkeenna

___ b) Si taxaddir leh, inagoo jacayl u hayna qoyskeenna

21 Waxa xigmaddu ku jirtaa inaan ka digtoonaano qaraabadeenna aan Masiixiyiinta ahayn. Tallaabooyinka taxaddirka ah ee u baahan in la qaado maxaa ka mida si warka ku saabsan baabtiiskeennu aanu u shaac bixin oo dhibaato u keenin? *(qor fikirkaaga oo u diyaargarow falanqaynta)*


______________________________________________________________________

______________________________________________________________________

22. Talo noocee ah ayaad siin lahayd Masiixi aanu lammaanihiisu ahayn qof Masiixa rumaysan? Ma waxa wanaagsan in Masiixigaasi imminka is baabtiiso mise waxa habboon inuu sugo isagoo rajaynaya in lammaanihiisu uu isna raaco Masiixa? *(qor fikirkaaga oo u diyaargarow falanqaynta.)*

______________________________________________________________________

______________________________________________________________________




**DHAQANGELINTA CASHARKA 14**

Haddaan weli lagu baabtiisin, waxaad arrintan kala hadashaa qofka aad ku magacawday su'aasha 19. Ka qaado talada xilliga lagu baabtiisi lahaa iyo goobtii lagugu baabtiisi lahaa. Sidoo kalena Ilaah talo waydii.

## MURAAJACADA CASHARKA 14

1 Dusha ka qor aayaddii xafidaadda: "Haddaba taga, oo quruumaha oo dhan xer ka dhiga, ________________________________________________________________
________________________________________________________ (Matayos ___ : ___)

2 Waxaan baranay in baabtiiskaygu saddex waxyaalood calaamad u yahay? Maxay kala ahaayeen?

a) 'Waxaan ahay _____________ cusub'

b) ' __________ waa _______________ '

c) 'Waxaan ku biiray _____________ Masiixa'

3 Muhiimad intee leeg ayaa ku jirta in lagu baabtiiso?

___ aad bay muhiim u tahay ___ muhiim maaha

## JAWAABAHA CASHARKA 14

1 baabtiiska
2 xafid aayadda
3 c)
4 a) 2 b) 1
5 Masiixa ayaan ku ahay qof cusub
6 jawaabtaada shaqsi ahaaneed
7 4
8 cusub
9 b)
10 dhiigga Ciise
11 a)
12 ummad
13 hako oo Ilaah u mahadnaq
14 a) cusub b) dembiyo c) ku biiray
15 a) inaad hore u guursatay
b) ninkaaga ama naagtaada
c) Masiixa
16 u diyaargarow inaad markhaatifurkaaga bixiso
17 b) ayaa wanaagsan
18 a) iyo d) ayaa wanaagsan
19 sax sanduuqa dhexdiisa haddaad garanayso qof xigmad leh
20 b)
21 falanqaynta
22 falanqaynta